

MACLUUMAADKA AMMAANKA WADDADA

ADIGA AYAA MAS'UUL KA AH AMMAANKA CARRUURTAADA MARKAY U SOCDAAN AMA KA SOO SOCDAAN

Si ammaan ah u wado oo udhigo meelaha u dhow dugsiyada

Bilowga iyo dhammaadka maalinta dugsiyada jiro waa waqtiyo ku mashquul ah dadka lugta ah iyo darawalada jooga dugsiyada dibaddiisa.

Waxaad ka caawin kartaa inaad ilaaliso nabadgelyada caruurta adiga oo xusuusta waxyaalahan soo socda:

- dhig carruurta oo ka soo qaad dhinaca xiga dugsiyada ee wadada
- Waligaa ha uga yeerin caruurta dhinaca kale ee waddada – waa khatar aad u daran
- marwalba sii taxadar dheeraad ah markaad baabuur ku wadato 40km ee soonayaasha dugsiyada
- raac dhammaan calaamadaha dhigashada baabuurta – kuwaasi waxay kugu caawinayaan inaad caruurta u ilaaliso si ammaan ah intii suurtagal ah
- udhigo baabuurka si masuuliyad leh xiitaa haddii tani ay ka dhigan tahay inaad ka soo lugayso meel ka fog iridda dugsiyada
- marna hasamayn isbabar-dhig baabuurta – waa sharci-darro waxayna halis gelinaysaa carruurta
- marnaba haku sameynin U-turn ama leexasho saddex-dhibcood dibadda dugsiyada sababtoo ah caruurta waxay gelinaysaa halis waxyeello inay gaarto
- samee habdhaqanka ammaan ah oo tixgeli hab-dhaqanka dadka lugta ah iyo darawalada ku aadan carruurtaada.

Markaad ku safraysid baabuur hubi in carruurtaada:

- isticmaal kursiga buusterka haddii ay da'doodu u dhaxeeyso 4 ilaa 7 sano jir – sidaasi waa sharci
- si sax ah ayay ugu xiran yihiin suunkooda
- had iyo jeer ka soo galaan oo ka baxaan baabuurka 'albaabka ammaanka ah' – albaabka danbe oo xiga dhinaca wadada ee baabuurka
- marna keligood looga tegin baabuurka.



Ilaa 6 bilood

Kursiga baabuurkailmaha oo gadaal ujeeda oo la ogolaaday



6 bilood ilaa 4 sano

Kursiga baabuurka ilmaha oo horay ama gadaal loo jeediyey ama kursiga suunka oo la ogolaaday



4+ sano

Kursiga baabuurka ilmaha oo horay loo jeediyey ama kursiga suunka oo la ogolaaday



145cm ama kadheer

Dherarka ugu yar ee lagu taliyay inuu isticmaalo suunka laabta ee baabuurka qaangaarka ah

Wixii taageero dheeraad ah

Ka-qaybgal barnaamijka Waxbarashada Ammaanka Waddada ee Wasaaradda
<https://education.nsw.gov.au/road-safety-education> ama ka eeg
<https://education.nsw.gov.au> oo baar waxbarashada ammaanka waddada.